

# Hagaha kireystaha ee beekhaaminta biyaha iyo tamarta korontada

Uma baahnid inaad guri lahaato si aad uga faa'iido falalka beekhaaminta biyaha iyo xoogga korontada. Ugu dhowaan saddex meeloodow meel dadka australiyaanku waxay ku nool yihiin guryo kiro ah, iyadoo ay jiraan waxyaalo ku xadidaya oo ah waxaad ka bedeli karto gurigaaga kirada ah waxaa jira siyaalo lagu yareynayo biilashaada iyo saameynta degaanka, xitaa haddii looxyada ileyska qoraxda iyo taangiyada biyaha roobka aysan ahayn tallo. Sidoo kale, qaar ka mid ah talaabooyinka ugu wax ku oolsan oo aad qaadi kartid si loo beekhaamiyo tamarta iyo biyaha oo xoogga la saaraya sameynta isbedelada yar yar waxqabadkaaga maalmeed oo aan kuu lahayn kharashka lacageed adiga gebi ahaanba.

Haddii aad kireysanayso wakhti gaaban ama wakhti dheer, waxaa jira waxyaalo fara badan oo sahlan, aan qaalina ahayn oo aad sameyn karto si aad u yareyso isticmaalka biyaha iyo xoogga korontada oo beekhaamin kartaa boqolaal doolar wakhti ilaa hal sanno ah adoon qaab nololeedkaaga ama raaxadaada deynaynin.

## Fikradaha lagu beekhaaminayo tamarta

Si fiican u isticmaalida tamarta (oo mar marka qaarkood loogu yeero si fiican u isticmaalida tamarta) waxay dhammaan ku saabsan tahay isticmaalka tamar yar adoo bixinaya waxqabad iskumid ah, raaxo iyo ku haboonaanba. Iskuday talaabooyinkan ficilka ah ee lagu yareynayo biilashada iyo isticmaalka guriga.

- ✓ **Doorashada qalab si fiican u isticmaala tamarta.** Qalabka guriga waxay dhan yihiin ilaa boqolkiiba 30 isticmaalka tamarta guriga, saa daraadeed nooca qalabka ee aad doorato iyo sidaad u isticmaashid ayaa ku keenaysa isbedel weyn isticmaalkaaga biilashada iyo tamarta. Haddii aad soo iibsaneysa qalab cusub, ka feker soo iibisiga (energy-efficient) nooca tamarta si fiican u isticmaala. Raadi darajada tamarta ah leh si aad u ogaatid sida isticmaalkiisa fiican ee tamarta yahay - xiddigaha badan ee uu leeyahayba waxay ka dhigan tahay tamarta iyo lacagta badan ee aad beekhaamin karto.
- ✓ **Kontoroolida cimiladaada.** Qiyaastii boqolkiiba 40 isticmaalka tamarta ee guriga (heating and cooling) waxaa isticmaala qaboojinta iyo kululeynta. Xilliga qaboobaha, ka feker inaad ka dhigta termostaatka cabira kuleylka ilaa 18–20 darajo Celsius. Xilliga kuleylaha, iskuday inaad geyso termostaatka qaboojiyaha ilaa 25–27 darajo Celsius. Geyntaa termostaatka cabiraada xitaa hal

Arabic  
Bosnian  
Chinese Simplified  
Chinese Traditional  
Croatian  
Dari  
Dinka  
English  
Farsi  
Filipino  
Greek  
Hindi  
Indonesian  
Italian  
Karen  
Khmer  
Kirundi  
Korean  
Kurmanji  
Macedonian  
Malay  
Punjabi  
Russian  
Serbian  
Shona  
Sinhala  
Somali  
Spanish  
Sudanese Arabic  
Swahili  
Thai  
Turkish  
Vietnamese

darajo ka kore (ama ka hoose) wuxuu yareyn karaa tamarta aad u isticmaasho kuleylinta iyo qaboojinta gurigaaga boqolkiiba 5 ilaa 10 darajo. Markuu kuu shidan yahay kululeeyuhu ama qaboojiyuhu, soo xir qolalka aadan isticmaalaynin albaabaddooda gudaha.

- ✓ **Xirida dilaacyada iyo meelaha bannaan.** Gurigaaga ka ilaalinta inuu kululaado (draught-proofing your home) iyo joojinta inay ka baxdo hawada la kululeeyey ama la qaboojiyey meelaha bannaan iyo dilaacyada, waxaad ku yareyn kartaa biilka tamarta ilaa boqolkiiba 25. Iskuday maro ciid laga buuxiyeyoo joojineysa qalaylka (sida ‘mas’ dheer oo kale ah) si aad uga ilaalisid hawada inay ka baxsato albaabada hoostooda una isticmaal xiritaanada hawada daaqaadaha, looxda sagxada, looxda skirting, iftiinka cirka iyo farshaxanka. Weydii mulkiilahaaga kahor intaadan ku xiran wax kasta oo hawada xiraya.
- ✓ **Hagaaji fiicanaanta daaqaada.** Ka hortag lumitaanka kuleylka adoo ku rakibaya daahyo iyo daboolayaal si ay kugu dabraan heerka kore ee hawada ku xigta daaqaada. Waxaad sidoo kale furi kartaa daahyada xiliga qaboobaha si aad ugu ogolaato qoraxdu inay soo gasho maalinta inta lagu jiro iyo inaad xirto ka hor intaysan mugdi noqon. Waxaa sidoo kale la mid ah, waa fikrad fiican inaad xirto daahyada inta lagu jiro qaybta ugu kulul xilliga kuleylaha maalintii.
- ✓ **Ka doorashada Marawaxada Qaboojiyaha.** Safiitada iyo marawaxada dhulka waxay joogaan kharash ahaan boqolkiiba hal saacadii hawlga ah waxayna soo saaraan beekhaaminta gaaska oo aad uga yar qaboojiyaha. Marawaxadaha waxay inaga caawiyaan inay wareejiyaan hawada waxaana loo isticmaali karaa inay hagaajiyaan wax ku ool nimada nidaamka wax qaboojinta iyo sidoo kale inay wareejiyaan hawada kulul oo ay hagaajiyaan si fiican u isticmaalka kuleylkaaga inta lagu jiro xiliga qabow.
- ✓ **U bedelashada nalka tamarta si fiican u isticmaala.** Qiyaastii boqolkiiba 7 isticmaalka tamarta gurigu waxay gashaa nalka. U bedelashada nalka si fiican u isticmaala tamarta iyo u isticmaalida nalalka si fiican (using lights efficiently) waxaad kala bareysaa kharashka korontada. U bedelashada nalka tamarta sida fiican u isticmaala iyo u isticmaalida nalalka si fiican waxaad kala bareysaa kharashkaaga korontada. Adoo bedelaya guluubyadii noocii hore ee nalalka wada socda ee (CFLs) ama kuwa nalka soo saara (LEDs) waa hab wax ku ool ah oo loo beekhaamiyo kharashaadka tamarta. CFLs waxay isticmaalaan qiyaastii boqolkiiba 20 tamarta guluubka nalka ah waxayna jiri karaan inta u dhaxeysa 4 ilaa 10 jeer in ka badan.
- ✓ **Awooda koronto ee heeganka ah.** Qalab fara badan iyo alaabtuba sida kaarikeeyayaasha taleefanada, konsoolada ciyaarta, cunto kululeeyaha/foorneeyaha iyo kuwa wax duuba waxay sii wadaan inay xoog koronto isticmaalaan markaan la isticmaalaynin. Awoodan koronto ee heeganka ahi waxay isticmaali kartaa boqolkiiba 10 isticmaalka korontada ee gurigaaga. Adoo ka deminaya qalabka iyo alaabtuba derbiga markaad ka dhameysato waxaad jaraysaa labadaba biilashaada iyo isticmaalka tamarta. Haddii aad leedahay nal yar oo heegan ah ama saacad ay isticmaaleyso xooggeeda tamarta.
- ✓ **Filinjeerada iyo qaboojiyayaasha.** Heerkulka ugu sareeya ee filinjeerkaaga wuxuu u dhaxeeyaa 3 ilaa 5 darajo oo Celses; ama inta u dhaxeysa togane 15 ilaa togane 18 darajo oo Celses oo ah qaboojiyahaaga. Darajo kasta oo ka hooseysa waxay u baahan tahay boqolkiiba 5 tamar ka sii badan. Hagaaji koronto si fiican u isticmaalka filinjeerkaaga iyo qaboojiyahaaga adoo ka qaadaya wixii baraf qaboob ah oo ku sameysmay qaboojiyaha gudihiiisa adoo u daynaya meel u dhaxeysa oo dhan 5–8 sentimitir qiyaastii iyaga wixii hawo qaadasho ah. Haddii aad heysato filinjeer labaad oo aad ugu talagalashay madadaalada, shid markaad u baahan tahay.
- ✓ **Dhaqida iyo qalajinta dharka.** Markaad qasaalada wax ku mayraysid, beekhaami biyaha iyo tamarta korontada adoo isticmaalaya biyaha qabow, wareega ugu gaaban ee suurtagalka ah, hagaajinta heerka biyahaaga si uu ugu haboonaado xajmiga waxaad dhaqayso iyo sugitaanka ilaa inaad ka helayso dhar badan oo aad isla mar dhaqdo. Dharka ku qalaji xariga dharka intii aad isticmaali lahayd qalajiyaha dharka ee korontada—kharashkiisu waa bilaash.

## Tallooyinka beekhaaminta biyaha

U isticmaalida biyaha sida fiican kaa caawineysaa in dhibic kasta oo biyo ah iyo doolarba la xisaabiyo. Waxaa jira ficilo fara badan oo laqaadayo si biyaha loogu isticmaalo si waxgarad leh guriga iyo jardiina si aad u caawiso inaan u hanano biyo mustaqbalkeena.

- ✓ **Tixgelinta si qalabka iyo waxyaalaha rakiban si fiican u isticmaalkooda biyaha.** Markaad iibsaneysa qalab cusub ama waxyaalaha rakiban, ka feker nooca biyaha sida fiican u isticmaala (water-efficient model). Raadi darajada, Water Efficiency Labelling and Standards (WELS).
- ✓ **U isticmaalida qasabadaha biyaha si fiican.** Tuunbo biyo siideynaysa heerka ah hal dhibic ilbirigsigiiba waxay lumisaa wax ka badan 12,000 litir oo biyo ah sannadkii. Beekhaami biyaha adoo sameynaya tuunbo kasta oo biyo siideynaysa sida ugu dhakhsaha badan ee suurtoogalka ah. Waxaad ku yareyn kartaa isticmaalkaaga biyaha adoo ku rakibaya xaddidayaasha biyaha. Xaddidayaasha socodka biyaha waxaana lagu rakibi kartaa tuunbooyinka bannaanka ama gudaha. Waa inaad ka jeegareysaa mulkiilahaaga ka hor intaadan sameyn taas.
- ✓ **Rakibida madaxyada qubeyska ee biyo isticmaalka fiican.** Haddii aad heysato madaxyada qubeyska gaboobay ee isticmaalka xun, adoo isku deyaya inaad weydiiso mulkiilahaaga inuu iyaga bedelo ku bedelo noocyada isticmaalka biyaha fiican maadaama ay kuwani isticmaalaan saddex meeloodkiiba hal meel biyaha oo aad beekhaamin karto wax ka badan \$200 sannadkii biilashada biyaha iyo tamarta korontada.
- ✓ **Biyo raacinta musqulaha.** Markaad isticmaalayso musqulaha biyo raacinta labada ah leh, door bid biyo raacinta barka ah meeshii ku haboon. Haddii mulkiilahaagu uu ku bedelayo musqulaha leh hal mar oo biyo raacin ah, ka feker tallo ku bixinta nooca biyo raacinta labaalaha ah (water-efficient dual flush model) ee biyo isticmaalka fiican maadaama uu beekhaamin karo 51 litir qofkiiba maalintii. Haddii aysan tani ahayn fursad, waxaad iibsan kartaa qalabka biyo qaadaha ama isticmaal dhalada balaastiga ah ee ay ka buuxaan biyo keydiyaha si loo yareeyo intuu biyo qaadi karo.
- ✓ **Yaree isticmaalka biyaha jardiinka.** Daarada cagaaran ee caadiga ah waxay isticmaali kartaa ilaa 90 boqolkiiba biyahaaga jardiinada. Waad yareyn kartaa tan adoo ka dhigaya cawsjarahaaga inuu jaro 4 centimitir ama wax ka sareeya adoo hagaajinaya biyo isticmaalkaaga (improving watering practices) oo dooranaya qalabka biyaha sida fiican u isticmaala.

## Ila macluumaadka kireystayaasha

### La hadlida mulkiilahaaga ama wakiilkaaga guriga

Dayactirka, dayactirka ama waxka qabadka, oo ay ku jiraan hagaajin kasta oo waari kasta, waxayna badanaa u baahan doontaa ogolaansho (iyo lacag)ka timaada mulkiilahaaga. Gobol kasta iyo territory wuxuu leeyahay shuruuc kala duwan oo loogu talagalay kireystayaasha, saa daraadeed waa muhiim inaad sameyso daraasadaada oo aad weydiisato ogolaansho ka hor intaadan ku sameyn wax isbedel ah guriga.

Waxyaalaha qaarkood ay tahay inaad maskaxda ku heyso waa markaad u tageyso mulkiilahaaga ama wakiilka guriga si aad uga codsato hagaajinta waxyaalaha waara waxaa ka mid ah:

- ✓ **Caawimaada iyo lacag celinta.** Waxaa jira tiro lacag celineed iyo caawimaada ay heli karaan mulkiilayaasha guryuhu sameynta ay sameeyeen hagaajin waarta. Si ay kaaga caawiso caawimaadaada waxaad sameyn kartaa qaar ka mid ah daraasada mulkiilahaaga iyo inaad sahamiso qaybteena caawimaada iyo lacag celinta (rebates and assistance sections) si aad u ogaado waxa khuseeya xaaladaada.
- ✓ **Cashuur ka jarida.** Hagaajinta guryaha cagaarka ah oo badani, iyo sidoo kale dayactirka iyo sameynta, waa wax cashuurta laga jarayo aad bixin lahayd. Waxaa laga yaabaa inaad jeclaan lahayn inaad eegto Hagaha mulkiilayaasha guryaha kirada ah (Guide for rental property owners) ee Xafiiska Cashuuraha Australiya si aad u aragto waxyaalaha gurigaaga khuseeya iyo ugudbinta mulkiilahaaga akhbaarta wanaagsan.

- ✓ **Faa'iidada maalgelinta.** Adoo maalgelinaya hagaajinta waxyaalaha waara, mulkiilahaagu wuxuu kordhinayaa qiimaha guriga wuxuu ka dhigayaa mid aad u soo jiidata iibsadayaasha mustaqbalka iyo kireystayaasha.

Waa inaad hubisaa inaad ugu sheegto codsi kasta mulkiilahaaga ama wakiilkaaga guriga si qoraal ah. Haddii aad u baahan tahay caawimaad, sidoo kale waa feker fiican inaad diiwaanka dhammaan codsiyada aad xafido iyo sidoo kale wixii heshiisyo ah ee mulkiilahaaga ama wakiilka guriga si aad isbedel ama hagaajin u sameyso.

## **Ma dooneysaa inaad ogaato oo aad wax badan beekhaamiso?**

Tallooyin ficil ah oo badan kala duwan oo ku saabsan tamarta, haleynta, si fiican u isticmaalka biyaha iyo safarka iyo sidoo kale macluumaadka ku saabsan caawimaad dawlada waxaa laga helayaa iyadoo af Ingiriis ah bogga internetka ee [www.energy.gov.au](http://www.energy.gov.au).

## **Macluumaadka mulkiilayaasha iyo kireystayaasha ee gobol iyo territory kasta**

### **Afeef**

*Dawlada dhexe ma damaanad qaadeyso saxnimada dukumiintiga turjumaada laga sameeyey wax feker ahna kama soo jeedineyso saxnimada ama sida kale wax macluumaad ah oo ku jira dukumiintigii asalka ah ama turjumaadan. Dawlada dhexe kama bixineyso wax dammaanad ah oo la xiriirta turjumaadan, oo ay ku jirto sax ahaanta turjumaada. Dawlada dhexe iyo saraakiisheeda, shaqaalaheeda ama wakiiladeeda looma qabsan doono wixii waxyeelo ah, khasaare dhaawac oo ka dhashay si toos ah ama si aan toos ahayn ee qof kasta isticmaalkiisa ama isku haleyntiisa turjumaadan, haddii ay tahay ama isticmaalkan ama isku haleyn ku saleysan macluumaad ama talo ay bixisay wakaaladu.*